# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA GANACSIGA & WARSHADAHA

**XEER-NIDAAMIYAHA**

**“DHOOFKA, SHAHAADOOYINKA & ASTAAMAHA TAYADA ”**

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha** **2023**

## TUSMADDA XEER-NIDAAMIYAHA


CUTUBKA KOWAAD: QODOBO HORUDHAC AH .......... 2

Qodobka 1aad: Magaca Xeer-Nidaamiyaha .......... 2

Qodobka 2aad: Qeexid .......... 2

Qodobka 3aad: Ujeedada Xeer-nidaamiyaha .......... 2

Qodobka 4aad: Baaxadda Xeer-nidaamiyaha .......... 4

Qodobka 5aad: Waajib Ahaanshaha Waafaqsanaanta Hal-Beegyada .......... 5

CUTUBKA LABAAD: ASTAANTA MIDAYNTA TAYADA .......... 5

Qodobka 6aad: Astaanta Midaynta Tayada .......... 5

Qodobka 7aad: Soo-saarista Astaamo Kale .......... 6

CUTUBKA SADEXAAD: HABKA SHAHAADO QAADASHADA .......... 6

Qodobka 8aad: Codsiga Oggolaanshaha Isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada .......... 6

Qodobka 9aad: Baaritaan (Audit) .......... 6

Qodobka 10aad: Tijaabinta Muunadda Badeecadda .......... 7

Qodobka 11aad: Dib-u-eegista Warbixinta Baaraha .......... 8

Qodobka 12aad: Gaaridda Go'aanka Oggolaanshaha Isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada .......... 8

Qodobka 13aad: Arrimaha uu Ka Koobnaanayo Oggolaanshaha .......... 8

Qodobka 14aad: Shuruudaha Isticmaalka Oggolaanshaha .......... 9

Qodobka 15aad: Wareejinta Oggolaanshaha .......... 10

Qodobka 16aad: Isbeddelka Shuruudaha Oggolaanshaha .......... 10

Qodobka 17aad: Mas'uuliyadda Haystaha Oggolaanshaha .......... 10

Qodobka 18aad: Diidmada Bixinta Oggolaanshaha .......... 10

Qodobka 19aad: Baaritaan Iyo Kormeer .......... 11

Qodobka 20aad: Cusboonaysiinta Oggolaanshaha .......... 11

Qodobka 21aad: Diiwaan-Gelinta Badeecadda Haysata Shahaado .......... 12

Qodobka 22aad: Burburinta, Ka-Noqoshada, Ka Joojinta Ama Kala-Noqoshada Oggolaanshaha .......... 12

Qodobka 23aad: Kala-Noqoshada Ama Burburinta Ku Salaysan Codsiga Rukhsadlaha .......... 14

Qodobka 24aad: Cabasho Go'aan Maamul .......... 14

Qodobka 25aad: Khidmadaha Astaanta Midaynta Tayada Iyo Shatiyada .......... 14

Qodobka 26aad: Dhaqan-gal .......... 14

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO HORDHAC AH

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa **"Xeer-nidaamiyaha Dhoofka, Shahaadooyinka iyo Astaamaha Tayada**".

### Qodobka 2aad
### Qeexid

Haddii aan si kale loogu qeexin xeer-nidaamiyahan gudihiisa, erayada soo socda mid kasta wuxuu leeyahay macnaha hor qoran-

| | |
|---|---|
| **Sharciga:** | waxaa loola jeedaa Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed; |
| **Sarkaal idman:** | waxaa loola jeedaa qofka uu soo magacaabay Maareeyaha hay'adda Tayo-dhawrka una xilsaaran gudashada shaqooyinka hay'adda si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan; |
| **Codsade:** | waxaa loola jeedaa shirkadda ama qofka soo qoranaya arjiga isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada; |
| **Baaris:** | waxaa loola jeedaa hab-nidaamsan, oo qoran ayna sameynayso cid ka madax-banaan shirkadda/hay'adda la baarayo, oo ujeedka loo sameynayo ay tahay helitaanka caddeymo sugan oo la xaqiijin karo iyo in caddeymahaas loo qiimeeyo si hufan si loo go'aamiyo xaddiga la-baaruhu waafaqsan yahay shuruudihii ama sifaadkii baaritaanka; |
| **Baare:** | waxaa loola jeedaa qofka sameynaya baarista; |
| **Khabiir Farsamo:** | waxaa loola jeedaa qofka aqoon ama khibrad khaas ah u leh waxa la baarayo; |
| **Hay'adda:** | waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed; |
| **Shahaado:** | waxaa loola jeedaa shahaado dhammeystirtay nidaamka xeerarka & hab-raaca loogu talo-galay; |
| **Astaanta Midaynta Tayada:** | waxaa loola jeedaa Astaanta Midaynta Tayada |

ee waafaqsan **Qodobka 36aad** farqadiisa (1) ee Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

**Waafaqsanaanta:** waxaa loola jeedaa soo-buuxinta shuruudo cayiman;

**Badeeco:** waxaa loola jeedaa shay, alaab ama wax kasta oo ah ama ugu dambeyntii noqon doona wax laga ganacsado ama la isticmaalo;

**Maareeye:** waxaa loola jeedaa maareeyaha Hay'adda oo lagu soo magacaabay si waafaqsan Qodobadda **10aad** iyo **14aad** ee Sharciga;

**Hal-beegyada Waajibka ah:** waxaa loola jeedaa hal-beegyada iyo jaan-gooyooyinka ay golaha Hay'adda shaaciyo inay waafaqsan tahay Qodobka **30aad** ee Sharciga;

**Soo-saaris:** waxaa loola jeedaa sameynta, soo-saarista, habaynta, isku-aadinta, beddelidda, wax-ka-beddelidda, qabadsiinta iyo u-beddelidda badeeco;

**Soo-saare:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ku hawlan; samaynta, soo-saarista, habaynta, isku-aadinta, isku-beddelidda, wax-ka-beddelidda, qabadsiinta, u-beddelidda wax kale ama shaqo kasta oo la xariirta badeeco hal-beeg leh;

**Waafaqsanaan la'aan:** waxaa loola jeedaa soo buuxin la'aanta shuruudo cayiman;

**Hal-beeg:** Waxaa loola jeedaa dukumenti lagu asaasay is-afgarad oo ay ansixiyeen hay'ad, dukumentikaas oo waafaqsan xeerarka & hab-raacyada loo marayo shaqooyinka looga gol-leeyahay dardar-gelinta faa'iidoyinka ugu wanaagsan ee bulsho;

**Kormeer Baaritaaneed:** waxaa loola jeedaa qiimeynta xilliyeed ee nidaamka xakamaynta Tayada ama badeecada ruqsad-haystaha, si loo go'aamiyo waafaqsanaanta hal-beegyada khuseeya, qodobbada iyo shuruudaha oggolaanshaha isticmaalka astaanta tayo;

**Sheybaar:** waxaa loola jeedaa shaybaarka cabbirka ama

| | |
|---|---|
| | go'aamiya sifada ama waxqabadka alaabta, agabka ama badeecadaha; |
| **Shuruudaha Shahaadada:** | waxaa loola jeedaa shuruudaha badeecada laga rabo in uu soo buuxiyo codsaduhu joogteeyana si uu shahaado u helo; |
| **Shuruudaha Badeeco:** | waxaa loola jeedaa shuruud si toos ah ula xiriirta badeeco, lagu qeexay hal-beeg ama dukumentiyada kale ee waajibka ah oo lagu tilmaamay nidaamka shahaado-bixinta; |
| **Nidaamka Shahaado-bixinta:** | waxaa loola jeedaa nidaam shahaado-bixin oo la xiriira nidaam ama badeecooyin la cayimay, kuwaas oo leh shuruudo, xeerar iyo hab-raacyo cayiman oo ay wadaagaan ama si gaar ah loogu dabaqo; |
| **Shahaadada Nidaamka:** | waxaa loola jeedaa shahaadada la siinayo hab-maamulka; hay'ad, shirkad, shakhsi, iwm; iyo |
| **Wasiir:** | waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Xukuumadda JFS. |

## Qodobka 3aad
## Ujeedada Xeer-nidaamiyahan

Si waafaqsan sharci Lr.27, ee soo baxay 2020, Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxa uu Xeer-nidaamiyahan ku faahfaahin doonaa qodobkiisa 35aad iyo qodobada kale ee khuseeya, si ay u hirgasho dhaqan-gelintiisa.

## Qodobka 4aad
## Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahani wuxuu khuseeyaa dhammaan badeecadaha lagu sameeyo Soomaaliya oo ay ku jiraan kuwa Dibadda loo dhoofinayo loona sameeyey hal-beegga Qaranka si waafaqsan **Qodobka 30aad** ee Sharciga.
2. Isticmaalka Astaamaha Midaynta Tayada ee hay'adda waxaa lagu dabbaqayaa badeecadaha laga soo-saaray Soomaaliya loona sameeyey hal-beegyo/shuruudo waajib ah ama Xeer-nidaamiye si waafaqsan sharciga.
3. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabbaqayaa shahaadada nidaamka (System Sertification) iyo tan qofka (Personnel Certification) si waafaqsan nidaam shahaado-bixineed kasta ee Hay'addu dejiso.
4. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan Cabbirada iyo hubinta sax-u-shaqaynta (calibration); agabka baarista dadka iyo Xoolaha, cabbirada iyo hubinta miisaanka, mugga ee ganacsiga khuseeya.

5. Xeer-nidaamiyahan waxaa kale oo lagu dabaqayaa codsiga iyo bixinta Abaalmarinta Tayadda Qaranka (National Quality Award).

**Qodobka 5aad**
**Waajib Ahaanshaha Waafaqsanaanta Hal-beegyada**

1. Qofku waa in uusan soo saarin, qaybin, iibin ama dhoofin badeecado loo soo saaray hal-beegyo waajib ah ama Xeer-nidaamiyeyaal kale, iyadoon badeecadahaasi la siinin shahaado muujinaysa inay hal-beegyada ama Xeer-nidaamiyeyaashaas waafaqsanyihiin Badeecadaha shahaadada la siiyo waxaa lagu calaamadayn/dhejin karaa Astaanta Midaynta Tayada.
2. Qofku wuu soo saari karaa, qaybin karaa, iibin karaa ama dhoofin karaa alaab ama ku shaqayn (diyaarin) karaa ama u suuqyada-geyn (xayeysiin) karaa nidaam kasta ama badeeco kasta oo hal-beeg qaran oo sida Sharcigu qabo lagu soo saaray ama leh hal-beeg kale oo nidaam-shahaadeed (certification scheme) lagu sheegay.
3. Qofka badeecadiisa lagu xaqiijiyey (shahaado loogu oggolaaday) si waafaqsan Sharciga Jaan-goynta & Tayo Dhawrka Qaranka, wuxuu ugu dhejin karaa Astaamaha Midaynta Tayada alaabtooda, xirmooyinkooda (packages) ama agabkooda kale ee xayeysiinta, si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

## CUTUBKA LABAAD
## ASTAANTA MIDAYNTA TAYADA

**Qodobka 6aad**
**Astaanta Midaynta Tayada**

1. Astaanta Midaynta Tayada, waxaana loo isticmaali doonaa in lagu kala saaro badeecadaha waafaqsan hal-beegyada iyo kuwa aan waafaqsanayn.
2. Haddii Astaanta Midaynta Tayada la isticmaalayo, waa in la raacaa oo Astaanta Midaynta Tayada lagu daabacaa meel muuqata oo ku taal wejiga hore (main panel) iyadoo la isticmaalayo qoraal waaweyn (bold), qoraalka iyo meesha lagu daabacayana waa in ay kala duwan yihiin (tusaale ahaan meel cad iyo far madow), markasta oo Astaanta Midaynta Tayada la isticmaalayo.
3. Astaanta Tayadu waa inay ahaataa mid la arki karo, la aqrin karo oo aan tirtirmaynin ama aan is-beddelaynin.
4. Naqshadeynta Astaanta Midaynta la weyneeyo ama la yareeyo waa in ay noqoto mid muuqata, la aqrin karo oo aan tirtirmaynin ama is-beddelaynin.
5. Astaanta Midaynta Tayada waa in lagu daabacaa, lagu soo saaraa ama lagu muujiyaa midab buuxa.

**Qodobka 7aad**

**Soo-saarista Astaamo kale**

Hay'addu waxay soo saari kartaa Astaamo kale oo tayo, iyadoo u sameynaysa nidaamyo shahaado, waxayna dhaqan-gelayaan marka wasiirku xeer ku soo saaro.

## CUTUBKA SEDDEXAAD
## HABKA SHAHAADO QAADASHADA

**Qodobka 8aad**

**Codsiga Oggolaanshaha Isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada**

1. Shirkadda ama qofka doonaya inuu soo saaro ama dhoofiyo badeeco si waafaqsan qodobka **30aad** ee Sharciga, loogu soo saaray hal-beegyo, waa in uu Hay'adda ama cid metelaysa ka codsadaa oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada sida ku cad qodobka **36aad** farqadiisa **(3)** ee Sharciga.
2. Codsiga rukhsadda waa in uu ahaadaa hab ay go'aaminayaso Hay'adda ama cid ku shaqaynaysa awoodeeda marka laga hadlayo bixinta, cusbooneysiinta ama kordhinta baaxadda shahaadada. Codsaduhu waa inuu u-hoggaansamaa shuruudaha nidaamka shahaado-bixinta sida ku cad heshiiska shahaado-qaadashada.
3. Badeeco kasta oo hal-beeg gooni ah leh iyo goob kastoo wax-soo-saar waa in loo sameeyo codsi u gooni ah. Shirkaddii leh badeecooyin dhawr ah oo ku kala duwan waxyaabaha ay ka mid yihiin: nooca, summadda ganacsiga (trademark)/calaamadaha (brand), jaadadka (variants) iyo sifo kasta oo kale oo shahaado loo raadinayo waa in lagu qeexaa codsiga shahaadada.
4. Codsiga waa in ay la socotaa xog ku filan oo ku saabsan xaaladda sharci (legal status) ee codsadaha.
5. Sarkaalka idmani wuxuu si qoraal ah ugu soo celin karaa codsadaha codsigiisa isagoo faraya codsadaha inuu soo sameeyo wax-ka-beddelka ama ku-kordhinta xogta uu codsiga ku soo qoray.
6. Haddii codsiga oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada la aqbalo, codsadaha waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo kharashaadka la xiriira.
7. Codsiga oggolaanshaha wuxuu shaqeynayaa muddada lagu go'aamiyey nidaamka shahaado-bixinta ee ay qeexday Hay'adda, muddadaas haddii la dhaafo, iyadoon oggolaasho la siinin waxaa loo baahanayaa codsi cusub in la soo gudbiyo.

**Qodobka 9aad**

**Baaritaan (Audit)**

1. Hannaanka baaristu waa inuu u socdaa habka ay u qeexday Hay'addu ama qof ay wakiilatay ama u xilsaartay.

2. Codsaduhu waa inuu u oggolaadaa baaraha ama sarkaalka Hay'adda metalaya in uu waqti kastoo ku habboon si aan xannibaad lahayn ku geli karo dhammaan xarumaha wax-soo-saarka, bakhaaradda ama meelaha kale ee in badeeco lagu kaydiyo codsiga lagu sheegay, oo ay ku jiraan helitaanka dukumentiyada gaarka u ah wax-soo-saarka, Tayada iyo tirada badeecadaha shahaadada loo rabo, si loo fuliyo waajibaadka Sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan.
3. Baaraha ama sarkaalka ay Hay'addu dirsatay waa in uu qiimeeyaa badeecada, warshadda iyo bakhaaradda, si uu u hubiyo in wax-soo-saarka, hababka hubinta Tayada iyo badeecadu waafaqsanyihiin shuruudaha badeecada iyo shuruudaha shahaado qaadashada.
4. Marka cusboonaysiinta oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta Tayada ama kordhinta baaxadiisa laga hadlayo, qiimaynta waxa ku jiri kara natiijadii baaritaanadii hore loogu fuliyey & ujeeddooyinkoodii, shahaado bixinta nidaamyada iyo shahaado bixinta badeecadaha.
5. Baaraha ama sarkaalka Hay'adda metalaya waa in uu diyaariyaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan natiijooyinka baaritaanka.

**Qodobka 10aad**
**Tijaabinta Muunadda Badeecadda**

1. Haddii baaruhu u baahdo in uu muunad qaado si uu badeecada tayadeeda ama bad-qabkeeda u qiimeeyo, codsaduhu waa inuu u fududeeyaa baaraha ama ciddii kale oo hay'addu u wakiilato inay muunado ka qaadaan badeecadaha iyadoo uu joogo codsadaha, ama cidda metalaysa.
2. Muunad-ka-qaadista badeecada, qiimeynta iyo/ama tijaabada waxaa lagu sameyn karaa codsadaha goobtiisa wax-soo-saarka, bakhaarka ama keydinta, suuqa ama meel kale oo muunad laga heli karo.
3. Muunad-ka-qaadista, qiimeynta iyo/ama tijaabada waxaa sameyn kara baare ama cid ay Hay'addu wakiilatay oo isticmaalaya qalabka tijaabada goobta (degdegga ah), iyadoo uu joogo codsadaha, ama qof ka wakiil ah.
4. Kharashka muunad-qaadista, raridda iyo tijaabinta shaybaarrada ama kharash kasta oo kale oo la galay oo la xiriira qiimeynta alaabta waa inuu bixiyaa codsaduhu.
5. Tijaabada badeecada waa in lagu sameeyaa Hay'adda ama shaybaar kale oo aqoonsi ama oggolaasho qoraal ah ka haysta Hay'adda.

6. Haddii Hay'addu aysan lahayn awood ay ku tijaabiso muunadaha waxaa lagu tijaabin karaa xarunta soo- saaraha iyadoo la adeegsanayo qalabka shaybaarka soo-saaraha ama iyadoo uu baaritaanka kor-jooge (mas'uul) ka noqonaya baare ka socda Hay'adda ama cid kale oo Hay'addu u fasaxday. Tijaabada waa in la fuliyaa iyadoo la raacayo hal-beegyada badeecadaas u gaarka ah.
7. Shuruudaha badeecadaha codsadaha lagu qiimeeynayo waa in ay noqdaan kuwa hal-beegyada lagu cayimay iyo dukumentiyada kale ee Hay'addu waajibka ka dhigtay.
8. Natiijooyinka tijaabada alaabta waa in la ogeysiiyaa codsadaha.

**Qodobka 11aad**
**Dib-u-eegista Warbixinta Baaraha**

1. Warbixinta baaraha waa in ay dib-u-eegis ku sameeyaan cid ka duwan kuwa sameeyey baaritaanka xarunta codsadaha iyo/ama tijaabada alaabta oo soo jeedinaya talo-bixinta ama u-diidista oggolaanshaha shahaadada.
2. Go'aanka shahaado-bixinta ama diidista waxaa iska leh oo ay Hay'addu magacawday "**Guddiga shahaado-bixinta**", wuxuuna Guddigu ka kooban yahay 7 (toddoba) xubnood oo aqoon iyo karti lagu doortay.

**Qodobka 12aad**
**Gaaridda Go'aanka Oggolaanshaha Isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada**

1. Hay'adda ama cid metalaysa Hay'adda, ayaa gaaraysa go'aanka lagu siinayo oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada haddii ay jiraan caddeymo ku filan oo tusaya waafaqsanaanta codsadaha ama inaan la siin Astaanta Midaynta ee Tayada haddii ay jiraan caddeymo ku filan oo tusaya waafaqsanaan la'aanta codsadaha.
2. Oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta tayadu waa inuu daboolaa badeecad kasta oo hal-beegii shahaadada lagu soo codsaday laguna bixiyey.

**Qodobka 13aad**
**Arrimaha Uu Ka Koobnaanayo Oggolaanshaha**

1. Warqadda oggolaanshaha ee ku xusan qodobka **11aad** ee Xeer-nidaamiyahan, waa in lagu muujiyaa xogta hoose:

b) magaca iyo cinwaanka hay'adda/shirkadda/ganacsiga;
t) magaca iyo cinwaanka codsadaha;
j) jaariikhda shahaadada la bixiyey;
x) taariikhda ay dhacayso shahaadadu;
kh) baaxadda shahaado bixinta (scope of certification); iyo
d) aqoonsiga gaarka ah ee oggolaanshaha.

2. Oggolaanshuhu wuxuu shaqeynayaa muddo 12 (labo iyo toban) bilood ah laga bilaabo taariikhda la bixiyey.

## Qodobka 14[aad]
## Shuruudaha Isticmaalka Oggolaanshaha

1. Qofka ruqsadda/oggolaashaha Astaanta Midaynta ee Tayada lagu siiyey si waafaqsan qodobka **12[aad]** ee Xer-nidaamiyahan waa inuu:
   b) u dhaqmo sida Hay'addu fartay ama u dejisay nidaamka xakamaynta/dhawridda, oo ay ku jiraan baaridda iyo tijaabinta;
   t) hubiyaa in badeecada oggolaanshaha la siiyey ay waafaqsan tahay hal-beegyada khuseeya; iyo
   j) joojiyaa dhammaan xayeysiinta ay ku jiraan tixraac kastoo oggolaanshahaas iyo Astaanta Midaynta ee Tayadu ku xusan tahay, haddii ay dhacdo in la laalo, lagala noqdo ama laga joojiyo oggolaanshaha.
2. Ruqsad-haystuhu waxaa kaloo ku waajibaya:
   b) inuu hubiyo diiwaan kasta oo la hayo ee la xiriira habka wax-soo-saarka in ay diyaar u yihiin qiimeynta iyo dib-u-eegista baaraha (yaasha) ama cid kasta oo Hay'addu u idmato, markuu codsado baaraha ama qofka Hay'addu u idmatay waa inuu u oggolaadaa ka-saarista diiwaanka, xarunta codsadaha iyo in la geeyo Hay'adda si baaritaan dheeraad ah loogu sameeyo;
   t) inuu u oggolaadaa baaraha ama cidda hay'adda ka socota inay geli karaan goobta badeecada ku qeexan oggolaanshaha Astaanta Midaynta ee Tayada lagu sameeyey ama lagu keydiyo si ay u qiimeeyaan agabka, hannaanka wax-soo-saarka, badeecooyinka diyaarsan, xarumaha Tayada lagu hubiyo iyo/ama diiwaannada lagu keydiyo; iyo
   j) inuu hubiyaa in diiwaan kasta oo la hayo ee khuseeya habka wax-soo-saarka ee loo sameeyey si loo qiimeeyo agabka, hababka wax-soo-saarka, badeecooyinka

diyaarsan, xarumaha Tayada lagu hubiyo iyo kuwa diiwaannada lagu keydiyo in si fudud lagu heli karo.

**Qodobka 15aad**
**Wareejinta Oggolaanshaha**

1. Oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada lama wareejin karo.
2. Haddii warshadda ama xarunta wax-soo-saarku ka guurto ciwaankeedii hore, soo-saaruhu waa inuu ogeysiiyaa Hay'adda ugu yaraan 21 (kow iyo labaatan) maalin-shaqo ka hor wareejinta isla markaana soo codsadaa oggolaansho cusub.
3. Haddii badeecaddii warshaddu soo saaraysay la beddelo ama habkii loo sameynaayey wax laga beddelo waa in oggolaashaha dib loo soo codsadaa.
4. Is-beddel kasta oo ku yimaada xaaladda sharciga ah ee shirkadda sida; beddelka magaca iyo lahaanshaha shirkadda waxaa waajib noqonaya dib-u-codsashadda oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada.

**Qodobka 16aad**
**Is-beddelka Shuruudaha Oggolaanshaha**

Hay'adda ama ciddii ay u wakiilato waqti kasta ayey beddeli karaan shuruudaha oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada lagu bixiyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 17aad**
**Mas'uuliyadda Haystaha Oggolaanshaha**

Shirkadda/Qofka ruqsadda haysta ayaa mas'uul ka ah tayada iyo bed-qabka alaabta isaga/iyada ayaana dusha u dhiganaya mas'uuliyadda wixii waxyeello ama dhaawac ah ee ka yimaada isticmaalka caadiga ah ee alaabta.

**Qodobka 18aad**
**Diidmada Bixinta Oggolaanshaha**

1. Hay'adda ama cidda ay u wakiilato waxay awood u leedahay inay diido bixinta oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada haddii:-
   b) badeecadda codsiga loo dalbanayo aysan waafaqsanayn hal-beegyada khuseeya;
   t) badeecadda codsiga loo dalbanayo uu mamnuucay sharci ama xeer-nidaamiye ka mid ah kuwa dalka; iyo

j) shuruudaha kale ee hoos imaanaya Xeer-nidaamiyahan ay soo buuxin wayso.

2. Hay’adda ama cidda ay u wakiilato waa inay qoraal ku sheegaan sababaha diidmada oo uu ku ogeysiinayo codsadaha diidmada muddo 15 (shan iyoo toban) maalin-shaqo gudahood ah ka dib marka uu go'aanka gaaro.

## Qodobka 19aad
## Baaritaan iyo Kormeer

1. Bixinta oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada soo saaraha ama dhoofiyaha waa inay ka dambaysaa baaritaan kormeereed iyo/ama muunad ka qaadista badeecada iyo baaris lagu sameeyo bakhaarka, wax-soo-saarka ama kaydinta, suuqa ama meel kale oo muunado laga heli karo.
2. Inta jeer iyo baaxadda baaaritaanada kormeerka ah waxa go'aaminaya Hay’adda.
3. Baaritaanka kormeerka ah waxa la samayn karaa iyadoon wax ogaysiis ah la siin haystaha oggolaanshaha isticmaalka Astaanta Midaynta ee Tayada si loo hubiyo in nidaamyada iyo hab-raacyada hore looga qiimeeyey sidii la rabay loo joogteynayo.
4. Shirkada ruqsadda haysata waa inay u oggolaataa baaraha (yaasha) iyo/ama cidii kale ee ay Hay’addu wakiilato si aan caqabad la ahayn inay ku geli karaan xarumaha wax-soo-saarka badeecadaha, oo ay ku jirto helitaanka dukumentiyada la xiriira wax-soo-saarka, Tayada iyo tirada alaabta shahaadada haysata.
5. Baaritaanka kormeerka ah waxaa kaloo la samayn karaa haddii ay jiraan cabashooyin, is-beddelo waaweyn oo ku yimaada alaabta, habka wax-soo-saarka ama shaqaalaha muhiimka ah ee shirkadda si loo qiimeeyo saameynta is-beddelada noocaas ah ay Tayada iyo bad-qabka badeecadaha ku yeelan karaan.

## Qodobka 20aad
## Cusboonaysiinta Oggolaanshaha

1. Shirkadda ruqsadda haysata waa inay ka codsataa Hay’adda ama qof ka wakiil ah cusboonaysiinta ruqsadda ugu yaraan 3 (saddex) bilood ka hor dhammaadka xiliga oggolaanshaha.
2. Habka dib-u-cusboonaysiinta oggolaanshaha waa in loo fuliyaa habka ay u qeexday Hay’addu.

## Qodobka 21aad
## Diiwaan-gelinta Badeecadda Haysata Shahaado

1. Hay'addu waa inay haysaa shaacisaana liis is-beddel kasta ka muuqanaya oo ay ku qoran yihiin ruqsad-haysteyaasha waana in liiskaas ay ku jirtaa xogta soo socota:-
   - b) qeexidda badeecada (product identification);
   - t) hal-beegga ay waafaqsan tahay;
   - j) aqoonsiga codsadaha;
   - x) taariikhda uu dhacayo oggolaanshaha; iyo
   - kh) lambarka oggolaanshaha.
2. Marka ruqsadda la cusboonaysiiyo, la hakiyo, lala noqdo ama la tirtiro, Diiwaan-gelinta/liiska waa in la cusboonaysiiyaa.
3. Astaanta Midaynta ee Tayada waxaa lagu dhejin karaa oo keliya badeecooyinka haysta oggolaansho ansax ah (valid permit).
4. Astaanta lagu ma dhejin karo badeecooyinka lagu sameeyey xarun aan ka ahayn tan ciwaankeedu ku qoran yahay oggolaanshaha.

## Qodobka 22aad
## Burburinta, Ka-joojinta ama Kala-noqoshada Oggolaanshaha

1. Hay'addu waxay awood u leedahay inay waqti kasta, la noqoto, hakiso ama burburiso oggolaanshaha muddo haddii ay ku qanacdo in:-
   - b) badeecada lagu dhejiyey Astaanta Midaynta ee Tayada aysan waafaqsanayn hal-beegyada khuseeya ruqsad-haystuhu uu isticmaalay oggolaanshaha badeecad aan waafaqsanayn hal-beeggii laga rabay;
   - t) ruqsad-haystuhu ku guul-daraystay inuu u fududeeyo baaraha ama qofkii Hay'adda metalayey si ay u gutaan waajibaadka hoos-imanaya Xeer-nidaamiyahan;
   - j) codsadaha shahaadada la siiyey uusan u hoggaansamin shuruudaha oggolaanshaha;
   - x) cabashooyinka macaamiisha ee la xiriira waafaqsanaanta badeecada iyo si xun u isticmaalka shahaadada sida been-abuurka badeecada (misuse of products) iyo xayeysiis been-abuur ah/dhagar ku jirto;
   - kh) hay'addu hesha caddeymo tilmaamaya in soo-saaruhu ama dhoofiyuhu uu ku helay oggolaanshaha qaab aan sharci ahayn sida laaluush ama been-abuur ah;
   - r) ruqsad-haystaha hore loogu xukumay dambi si waafaqsan Xeerka ama xeer-nidamiyahan; iyo
   - s) ruqsad-haystuhu uu ku xad-gudbay mid ka mid ah qodobbada Xeer-nidaamiyahan.

5. Ka hor inta aan la qaadin go'aanka ka-noqoshada, joojinta ama burburinta oggolaanshaha, Hay’addu waa inay ruqsad-haystaha ogeysiis qoraal ah oo sheegaya sababaha tallaabada looga qaadayo siisaa una sheegtaa 14 (Afar iyo tobban) maalmood haddii aanu jawaab Hay’addu ku qanacdo ku keenin in go’aankaasi dhaqan-gal noqonayo, Ruqsad-haystaha waa in la siiyaa fursad uu ku bixiyo sharraxaad qoraal ah afar iyo toban) maalmood gudahood.
6. Haddii ruqsad-haystuhu uu sharraxaad soo gudbiyo, Hay’addu waa inay tixgelisaa sharraxaadda. Sidoo kale, haddii ruqsad-haystuhu codsado waa in la siiyaa fursad lagu maqlo sida ugu dhaqsaha badan.
7. haddii wax sharraxaad ah uusan soo gudbin ruqsad-haystuhu sida ku xusan farqadda (2) ee qodobkan, ama Hay’addu aysan ku qancin sharraxaadda uu soo gudbiyey, Hay’addu, marka uu dhammaado waqtiga ogeysiisku 14 (Afar iyo toban) maalmood waxay ka noqonaysaa, hakinaysaa ama la noqonaysaa oggolaanshaha.
8. Haddii Hay’addu ku qanacdo sharraxaadda la soo gudbiyey, waa in aysan burburin, hakin ama la noqon oggolaanshaha.
9. Haddii Hay’addu burburiso, hakiso, ama la noqoto oggolaanshaha si waafaqsan farqadda (4) ee qodobkan, waa inay isla markiiba qoraal ahaan ku wargelisaa ruqsad-haystaha burburinta, ka joojinta ama kala noqoshada.
10. Haddii ruqsadda la burburiyey, la hakiyey ama lala noqday ama aan dib loo cusboonaysiin marka ay dhamaato muddada uu shaqaynayo (expiry date), rukhsad haystahu waa inuu isla markiiba joojiyo isticmaalka oggolaanshaha.
11. Joojinta iyo/ama kala noqoshada oggolaanshaha waa laga qaadayaa marka ruqsad-haystuhu uu soo buuxiyo dhammaan shuruudihii keenay hakinta/kala-noqoshada.
12. Shirkadda jebisa farqadda (1) ee qodobkan, waxay gelaysaa dembi, waxayna mutaysanaysaa ciqaab kasta oo ka mid ah ciqaabaha ku xusan qodobka **41$^{aad}$** ee Sharciga.

**Qodobka 23aad**
**Kala-noqoshada ama Burburinta Codsiga Rukhsadlaha**

Hay'adda ama qof ay wakiilatay ayaa burin kara ama joojin kara oggolaanshaha markuu sidaa codsado ruqsad-haystuhu, haddii:-
b) soo-saarista badeecada uu joojiyey soo-saaruhu ama hay'ad kale oo sharci ah; iyo
t) soo-saaruhu uu codsado in lagala laabto oggolaanshaha.

**CUTUBKA AFARAAD**
**QODOBBO KAMA-DEMBAYS AH**

**Qodobka 24aad**
**Cabasho Go'aan Maamul**

1. Cid kasta oo aan ku qancin go'aannada ku saabsan:
   b) diidmada bixinta ruqsadda;
   t) shuruudaha ruqsadda;
   j) ka-noqoshada, ka-joojinta, burinta ama burinta ruqsadda ama oggolaanshaha; ama
   x) kala-duwanaanshaha shuruudaha ruqsadda ama oggolaanshaha.
2. Wuxuu 14 (Afar iyo toban) maalmood gudahooda laga bilaabo marka lagu wargeliyo tallaabada ku xusan Faqradda (1) ee qodobkan, wuxuu cabasho qoraal ah u gudbinayaan Maareeyaha Guud ee Hay'adda, iyadoo go'aanka maareeyaha cabasho looga qaadan karo Wasiirka, intaas wixii ka dambeeya go'aanka Wasiirka waxaa cabasho looga qaadan karaa Maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 25aad**
**Khidmadaha Astaanta Midaynta ee Tayada iyo Shatiyada**

Dhammaan khidmadaha khuseeya Astaanta Midaynta ee Tayada iyo astaamaha kale ee Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (HTS), waxaa Xeer-nidaaamiye ku soo saaraya Wasiirka.

**Qodobka 26aad**
**Dhaqan-gal**

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu Golaha Wasiirradu meel-mariyo, Ra'iisul wasaaruhuna saxiixo, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.